# Iskaa-U-Shaqeeynta Ama Bilaabida Ganacsi yar iyadoo ay ku caawinayso Hay'ada VRS

Self-Employment or Starting a Small Business with Help from VRS

## Barnaamijka VRS ma iga caawin karaa inaan noqdo qof iskii u shaqeysta?

Adeegyada Tababarka Xirfadahu waxa ay kaa caawin karaan inaad noqoto qof iskii u shaqeysta ama bilaaba ganacsi yar iyadoo bixinaysa qaar ka mid ah kharashyada bilowga ganacsiga. Laakiin waxaa khasab inaad ka soo baxdo shuruudo badan oo la iska rabo ka hor inta aysan hay'ada VRS ku siin adiga wax dhaqaale ah.

## Ma ka heli karaa gargaar hay'ada VRS si aan u noqdo iskii-u-shaqayste ama si aan u bilaabo gannacsi yar?

hadii aad xaq u leedahay adeeygada tababarada xirfadaha waxaa dhici karta inaad dhaqaalo hesho si aad u noqoto iskii -u-shaqeyste ama aad u bilowdo ganacsi yar **hadii** aad ka soo baxdo dhamaan shuruudaha hoos ku xusan. Kharashka bilowga hawsha **waa in si** faahfaahsan loogu daraa qorshahaaga Shaqada ee qoran (EP).



1. La taliyahaaga xirfadeyntu waa khasab inuu go'aansado in aad ka bixi karto iskaa-u-shaqeysi iyo in kale. Si uu go'aankan u gaaro, waxaad u baahan tahay inaad sameyso qiimeyno nooc kale ah. Qiimaynahu waa khasab inay cadeeyaan inaad awoodo iskaa-u-shaqaysi aadna maamuli karto ganacsi yar.

2. Waa inaa qortaa qorshe ganacsi. La taliyahaaga ama qof khibrada u leh ganacsiyada yaryar oo beesha ah ayaa kaa caawin kara qorshahaaga ganacsiga.

   Waxaad sidoo kale ka heli kartaa akhbaar ku saabsan qorshayaasha ganacsiyada iyo bilowga ganacsi yar Xoghayaha Gobolka: https://mn.gov/deed/business/starting-business/. AMA raadso rugo kale oo deegaanka ah oo caawiya ganacsiyada yaryar.

   Qorshahaaga ganacsigu waa inuu lahaadaa:

   a. **Tilmaam ganacsiga ah**

   Oo ay ku jiraan: wax soo saarka iyo/ama adeega uu fidinayo
   nooca uu ganacsiga yahay oo uu ku sharciyeysan yahay (sida magaca loo bixiyey ama shirkad qaan u sheegadkoodu uu kooban yahay, iwm.)
   goobta
   saacadaha shaqada

**b. Akhbaarta dhaqaalaha**

Oo ay ku jiraan: ilaha maalgelinta (meesha ay lacagtu ka imaanayso)
Liiska qalabka ganacsiga (qor qalabka aad u baahan tahay)
warqada isu dheelitirka xisaabaadka
daraasada is gaarida dakhliga iyo kharashka
saadaalinaha dakhliga saafida ah iyo kan guud
saadaalinaha lacagta cadaanka ah ee ganacsiga soo galaysa

**c. Darsida suuqa.**

Oo ay ku jiraan: tartarnada ganacsiyada
Qorshe suuq geyn



**d. Tilmaam ah khibrada farsmado iyo maamulka macaamiisha**

**e. Sooraynta, shatiyada, canshuuraha, iyo shuruudaha caymiska**

**f. Dhaqan gelin ama jadwal xasilin**

Oo ay ku jiraan: bilowga hore ama kharashaadka xasilinta

g. **Liis ay ku qoran yihiin khataraha** suurta gal ah iyo dhibaatooyinka oo ay weheliyaan ra'yiyo iyo qorshayaal ku saabsan sida la isaga dhowro ama wax looga qabto.

3. Hadii aad u baahan tahay gargaar farsamo ama adeego la talin ah si aad u gaarto hadafkaaga, hay'ada VRS waa inay ku siiso adiga. Hadii aad u baahan in lagaa caawiyo sameynta hawlaha qiimeynta ama qaabeynta ama qorida qorshaha ganacsiga iyado sababtu tahay naafnimadaada, VRS waa khasab inay ku siiso gargaaro macquul ah.

4. Hadii uu ganacsigaagu yare yar yahay, VRS waxa ay kaa caawin qiimeynta qorshahaaga ganacsi si loo hubiyo inuu dhamaystiran yahay, in dhamaan wixii khatar ah la eegay, iyo in ganacsigaagu dhaqaalaha ahaan ay suurta gal tahay in lagu najaxo. Hadii ganacsigaaga yari uu xoogaa weyn yahay, qiimeyntan waa inuu sameeyo hay'ada amaaheed oo gobolka ama wadanka oo dhan ka diiwaan gashan oo xisaabeed ama barnaamijka (Micro-Enterprise).

5. Kolka qorshaha ganacsiga yar la dhameeyo lana ogaado in dhaqaale ahaan ganacsiga lagu najixi karo, waa khasab inaad sameysato Qorshe Shaqo (EP) oo qoraal ah. Waxa aad kala shaqeyn kartaa EP la taliyahaaga xirfadeynta iyo tababarka, ama adiga laftaada ayaa qoran kara ka dibna u soo bandhigi kara la taliyahaaga si uu qoraal ahaan ugu ansaxiyo.

   Labada mid kasta ha noqoto, waa khasab inaad cadeyso hadaf tababarid ah oo cayiman oo muujinaya nooca shaqada aad rabto, sida "roog sameeye." Sidoo kale waa inaad cadeyso **dhamaan** adeegyada xirfadaha tababarka ee loo baahan yahay **iyo** kharashka bilowga/xasilinta ganacsiga ee (EP). Eeg warqadayada xogta aruursan ee *Qorshayaasha Shaqada*.

6. Waa inaad dhigtaa lacag loogu talagalay kharashaadka ganacsigaaga. Inta ay tahay lacagtaasi waxa ay ku xiran tahay heerka dakhliga qoyskaaga. Waxa aad la buuxin doontaa foomka “Ka Qaybgalka Macmilka ee Dhaqaalaha” la taliyahaaga xirfadeynta. Taasi waxa ay muuijn inta ay tahay wixii lacaga ah ee laga yaabo inaad jeebkaaga ka bixiso.

7. Waa khasab inaad ka caawiso la taliyahaagu inuu raadiyo “manfacyo u dhigma.” Kuwaasi waa ilo kale oo gargaar dhaqaale laga heli karo si loo bixiyo baahidaada, sida hay’ad adeeg bulsho oo beeshaada ka jirta.

## Maxay bixin doontaa hay’ada VRS?

VRS waxa ay caawisaa bixinta kharashaadka bilowga ama xasilinta ee aad ku qorto qorshahaaga EP ga. Waxa ay caawiyaan bixinta xoolo ah ilaa iyo $9,300 ama cadad lagu dajiyey jadwalka khidmadaha ganacsiyada yaryar ee VRS. Jadwalka khidmadaha wax baa laga bedelaa sannad walba. Waxyaabaha ay caawiyaan bixintooda waxaa ku jira:

- Shatiyada shaqooyinka
- Aalada iyo qalabka
- Saadka iyo sahaynda wax lagu bilaabayo
- Gaari ganacsiga loo isticmaalo iyo/ama
- Gargaar la talin suuqa ah ama farsamo



VRS **ma bixiso** mushaarada ama gadasha dhul ama dhismayaal. VRS sidoo kale **ma bixiso** kharashaadka quseeya hawlgalada joogtada ah ee ganacsigaaga, ama kharashaadka musalifida.

Xadidaadaha bixinta kharashyada ee VRS kuma jiraan kharashaadka farsamada casriyeynta ama tababar. Farsamada casriyeyntu waa aalad takhasusid gaar ah oo aad ugu baahan tahay naafanimadaada awgeed si aad u noqoto qof iskii-u-shaqaysta ama leh ganacsi yar.

## Mashruuca Gargaarka Macmilka (CAP)

Hadii aad tahay macmil ama codsade adeegyada hay’adaha VRS ama SSB, waxa aad wici kartaa Mashruuca Gargaarka Macmilka (CAP) si aad caawimaad uga hesho, hadii aad qabto su’aalo,walaac, ama ashtako ku saabsan adeegyada tababarada xirfadaha. Hay’ada (CAP) ma bixiso adeegyo tababaro xirfadeed ah oo toos ah, sida, tacliin, tababarid, ama qalab.

Eeg warqadayada xogta aruursan ee Mashruuca Gargaarka Macmilka.

Wixii akhbaar ah ee kale ee ku saabsan (CAP) ama sida loo codsado adeegyada (CAP), ka wac:

- (612) 334-5970 (agagaarka beledyada)
- 1-800-292-4150 (gobolka oo dhan)

***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2023 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**